

Qoysaska Qaaliga ahow-

Iyadoo simistarkan koowaad ee aan horay loo arag uu dhammaanayo Janaayo 28-keeda, waxaan dooneynaa inaan xaqijino in dhammaan ardayda ay u guuleystaan sida ugu macquulsan. Waan ognahay in ardayda iyo shaqaaluhu ay ku dedaalayaan fasaladooda onlaynka iyo in barashada onlaynka ah aysan dhinac kasta kala mid ahayn barashada fool-ka-foolka ah. Iyadoo aan dhammeynayno xilli-dugsiyeedka, waxaan yara beddelaynaa toddobaadka ugu dambeeya jadwalka iyo labada maalmood ee ugu horreyya xilli-dugsiyeedka soo socda si aan u xaqijino in ardaydu ay helaan waqtii ay ku dhammeystiraan shaqadooda oo dhan, ku dhammeystiraan layliyadii hore loogu diray, oo isugu diyaariyaan xilli-dugsiyeed cusub iyo fasalo cusub.

Labada maalmood ee ugu horreyya xilli-dugsiyeedka cusub waxay u saamixi doonaan ardayda inay la qabsadaan fasaladooda simistarka labaad iyo inay dib u milicsadaan xilli-dugsiyeedka koowaad oo ay doortaan Xulashada Barashada Mooduulada galabtii. Macallimiintu waxay u adeegsan doonaan wakhtiga galabnimada inay Canvas ku diyaariyaan casharada xilli-dugsiyeedka cusub iyo inay la xiriiraan qoysaska.

| | Fasalada Subaxdii | Galabtii | Qoraalada Gaarka ah ee Dugsiga |
|---------------|---|--|--------------------------------|
| Janaayo 25-28 | Fasallada Tooska Caadiga ah ee Subaxa (ma jiro Jadwalka Arbacadu) | Saacadaha Shaqada ee galabtii (Ardaydu waxay doortaan waxa ay ka shaqeynayaan iyo fasallada ay diiradda saarayaan, iyadoo lagu saleynayo heerarka fasallada) | |
| Janaayo 29 | Ma jiro Dugsi- Maalinta Qiimeynta Macallimka | | |
| Febraayo 1-2 | Fasallada Tooska Caadiga ah ee Subaxa | Moduulada Xulashada Ardayda ee u Diyaarsanaanta Kulliyada iyo Shaqada, Culuumta Bini-aadmiga, STEM, PE, Farshaxanka wakan | |

Waxaan rajeyneynaa isbeddelkan yar ee jadwalka u saamaxo ardayda inay si wanaagsan u dhammeeyaan koorsooyinka, milicsi sameeyaan lana jaan qaadaan xilli-dugsiyeedka cusub. Macallimiintu waxay si toos ah ugala shaqeyn doonaan ardayda sida ugu habboon ee loo isticmaali karo saacadaha shaqada. Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan darajada ama shaqada koorsada ee ardaygaaga, fadlan la xiriir macallimiintooda ama la-taliyayaashhooda (SCHOOL INSERT NUMBER/EMAIL TO USE)